



Ka Qeybgalista Dugsiga Dhexe ee 2009-2010

San Diego Unified School District's ee Waaxda Fursadaha Waxbarashadda Dheeraadka ah(ELO) waxay maamushaa Barnaamijka Maalinta Dheer wax La Dhiganeyo ee PrimeTime, waxayna ardeyda da'da dugsiyada hoose iyo dhexe siisaa barnaamijyada wax la dhiganeyo inta aan dugsiga la soo gelin ka hor iyo marka dugsiga laga baxo kedib. Barnaamijka PrimeTime wuxuu lacag la'aan u yahay dhammaan qoysaska, waxaana la dhigaa maalin kasta inta aan dugsiga la soo gelin ka hor iyo marka dugsiga laga baxo kedib. Waalidiinta iyo dadka ilmaha masuulka ka ah waxaa laga rabaa inay ogaadaan in waxbarashada ilmaha laga taageerayo ka sokow, ay ilmuho qeyrkood dhex galayaan taas oo bulshanimada ku baranayaan jawi wacan. Barnaamijka PrimeTime waxaa si wadajir ah isaga kaashada shaqaalaha ELO, ururada PrimeTime Partner, waaxaha, barnaamijyada iyo shakhsiyaadka kale ee barnaamijka PrimeTime ka shaqeyo si uu u hirgelo. Barnaamijka PrimeTime ee heerka dugsiga dhexe saamiga shaqalaha iyo ardeydu 20 kii ardey iyo 1 shaqaale ah.

XAQ U LAHAANSHAHA

Ardeyda dugsiyada dhexe ee rabta in kaga qeyb galaan barnaamijka PrimeTime ee dugsiga halkan hoose ku taxan waxay xaq u leeyihiin inay ka qeyb galaan inta ay dugsiga ka diiwaangashan yihiin dugsiga ay sannad-dugsiyeed ay ka dalbanayaan inay maalinimada caadiga ah wax ka bartaan.

NIDAAMKA DIIWAANGELINTA LOOGU TALAGALAY

Qoysaska ay carruurtoodu ka diiwaangashan yihiin dugsiyada dhexe ee halkan hoose ku taxan loogama baahna inay soo buuxiyaan arjiga PrimeTime, si ay carruurtoodu barnaamijka uga qeyb galaan. Ardeyda dugsiga dhexe ku jirta ee xiiseynaysa barnaamijkan PrimeTime waa loo oggolaan doonaa. Foomamka Ka Qeybgalka Ardeyda ee PrimeTime 2009-2010 ayaa loo baahan yahay in la buuxiyo loona gudbiyo ururada Jaalalka ee carruurta adeegyada dugsiga ku siineya inay ka qeybgalaan wey bilaabi karaan. Dugsiyada dhexe taariikhaha la galayo wey kala duwanaan karaan, taas oo ku xidhan hadba sida loo heli karo saamiyada shaqaalaha ee dawlad-goboleedku u dejisan. Waxaa si aad ah laguugula talineyaa inaad Foomamka PrimeTime ee ardeyda aad gudbisid inta u dhexeysa bisha Juunyo 1 deeda , 2009, iyo dhammaadka sannad-dugsiyeedka si maalinta koowaad ee dugsiga loogu diyariyo shaqaalihii ku filaan lahaa.

Foomamka Ka Qeybgalka Ardeyda ee PrimeTime 2009-2010 waa in loo keenaa shaqaalaha PrimeTime ee dugsiga ay carruurtaadu dhigato ama boosatada lagu soo diro lagu soo hagaajineyo ururada Jaalalka (Partner) ee adeegyada bixiya. Foomamka Ka Qeybgalka Ardeyda waxaa laga heli doonaa dugsiga ay carruurtaadu dhigato, iyaga oo ku qoran afafka Ingiriisiga iyo Isbaanishka laga bilaabo bisha Juunyo 1, 2009, waxaadna shabakada Internetka ee Waxbarashadda Degmada oo ah www.sandi.net ka hli doontaan bisha Luuliyo 2, 2009. Foomamka Ka Qeybgalka Ardeyda ee sannad dugsiyeedka 2009-2010 waa in la soo buuxiyaa, si ay carruurtaadu uga qeyb galaan.

NIDAAMKA IMAANSHAHA

Sida uu dhigeyo Sharciga Waxbarashadda ee Kaalifoorniya, ardeyda waxaa looga baahan yahay inay maalin kasta oo barnaamijka la bixineyo yimaadaan, kana qeybgalaan saacadaha barnaamijka la bixineyo oo dhan. Ardeyda aan sida caadiga ah uga qeyb gelin barnaamijka waa laga saareyaa.

Wixii warbixin dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka PrimeTime ee dugsiga ay carruurtaadu dhigtaan, fadlan waxaad kala xidhiidhaa ha'yada adeegyada ee la yidhaahdo Jaalalka PrimeTime (PrimeTime Partner); telefoon namburada waxaa laga heli karaa Shabakada Internetka ee Waxbarashadda Degmada. Wixii su'aalo ah ee ku saabsan maamulka barnaamijka waxaad kala xidhiidhaa ELO oo telefoon nambarkoodu yahay (858) 627-7562.

Dugsi	Jaalalka PrimeTime	Dugsi	Jaalalka PrimeTime
Dhexe Bell	YMCA (619) 543-9850	Dhexe Marston	YMCA (619) 543-9850
Dhexe Challenger	Harmonium (858) 684-3184	Memorial Academy	ELO
Dhexe Clark	ELO	Memorial Prep	Memorial Prep (619) 822-6628
Dhexe Correia	YMCA (619) 543-9850	Dhexe Millennial Tech	Dhexe Millennial Tech (619) 527-6933
Dhexe CPMA	Harmonium (858) 684-3184	Dhexe Momentum	Dhexe Momentum (619) 644-1300 ext 1013
Dhexe Dana	SAY (858) 565-4148	Dhexe Montgomery	YMCA (619) 543-9850
Dhexe DePortola	YMCA (619) 543-9850	Dhexe Muirlands	YMCA (619) 543-9850
Dhexe Farb	SAY (858) 565-4148	O'Farrell Community	SAY (858)565-4148
Gompers Charter	Gompers Charter (619) 263-2171	Dhexe Pacific Beach	CCS (858) 272-5777
Dhexe High Tech (HTM)	Dhexe High Tech (619) 857-2304	Dhexe Pershing	YMCA (619) 521-3055 ext 2540
Dhexe Innovation	SAY (858) 565-4148	Dhexe Roosevelt	Dhexe Roosevelt (619) 293-4450 ext 4704
Dhexe Keiller	Dhexe Keiller (619) 263-9266	Dhexe Standley	SAY (858) 565-4148
Dhexe King/Chavez	CCS (858) 272-5777	Dhexe Taft	YMCA (619) 543-9850
Dhexe Lewis	SAY (858) 565-4148	Dhexe Wangenheim	Harmonium (858) 684-3184
Dhexe Mann	Dhexe Mann (619) 582-8990	Dhexe Wilson	SAY (858) 565-4148
Dhexe Marshall	Harmonium (858) 684-3184		